

ugaystaan ardayda kale ama shaqaalaha dugsiga, si lamida taas waa in ay bixiyaan jawaabo ku aadan dhacdooyinka midab takoorka iyo dhibaataaynta iyo in lagu wargaliyo dhacdooyinka noocaan ah NYSED.

Sida hoos lagu qeexayba, NYSED oo gacan kahelaysa Xafiiska Gobalka New York ee Xeer Ilaaliyaha Guud (“OAG”), wuxuu soo saaray tilmaan iyo adeegyo si gacan loo siiyo shaqaalaha dugsiga, macalimiinta, iyo waalidiinta warbixintooda waxna laga qabto dhacdooyinka dhibaataaynta, xoog usheegashada, iyo midab takoorka. Dukumiinti tilmaameed midaysan oo ay soosaareen NYSED iyo OAG bisha August 2016 waxaa kamid ah fook kasbo ah oo kahadlaaya wargalinta iyo baarista DASA ee dhacdooyinka.² Waaxdu waxay rajaynaysaa in shaqadaan muhiimka ah lawayneeyo ayadoo dugsiyada laxasuusinaayo iyo qoysaska in tilmaamida iyo caawinada farsamo ee quseeya DASA iyo in iskuulo amaan ah oo taageero leh ay leedahay waaxdu.

NYSED waxaa kudhiira galinaysaa degmooyinka, waalidiinta, iyo dadka caruurta masuulka ka ah kuwaasoo suaalo kaqaba DASA inay lasoo xariiraan NYSED si tilmaan loosiiyo iyo taakulo farsamo oo laxiriira maamusyada baaritaano quman iyo qaababka iyo talaabooyinka abuurida iyo ilaalinta bii'o iskuul amaan ah oo taageero leh. Waaxda waxaa lagasoo xariiri karaa.

- x Xafiiska Waxbarashada Labada luuqadood ah iyo Luuqadaha Caalamiga ah (OBEWL) adoo kala xariiraaya (718) 722-2445 ama obewl@nysed.gov, Ama
- x Xafiiska Adeegyada Taageerida Ardayga (SSS) adoo kala xariiraaya (518) 486-6090 ama studentsupportservices@nysed.gov.

SI dheeraad ah, dadka suaalaha kaqaba DASA kuwaasoo ubaahan caawimaad dhanka luuqada waxay laxariiri karaan Shabakada Kobalka ee Waxbarashada Labada luuqadood ah (RBERN) Teleefanka waalidka ah, ee kuyaala Jaamacada New York (“NYU”) ayadoo:

- x Labuuxinaayo foomka suaalaha ee halkaan
- x Phone: (800) 469-8224
- x Fax: (212) 995-4199
- x Email: nysparenthotline@nyu.edu
- x Mail: NYS ELL Parent Hotline Team
c/o NYS Statewide Language RBERN at NYU MetroCenter
726 Broadway – 5th Floor
New York, NY 10003

Shaqsiyaadku waxay sidoo kale racfaan kaqaadan karaan talaabada degmada taasoo waafaqsan Sharciga Waxbarashada §310. Sharciga Waxbarashada §310 waxay siisaa qolyahaas isku arka inuu ka eexday go'aan lagu qaatay kulanka degmada dugsiga ama maamulada dugsiga waxay racfaan udiri karaan Gudoomiyaha

² Tilmaantaan waxaa laga helikaraa <http://www.p12.nysed.gov/dignityact/documents/SED-AGLtrandGuidance8-31-16.pdf>.

Waxbarashada si loo fiiriyo talaabada noocaan ah. Macluumaadka buuxinta racfaanada waxay kuqoranyihiin, English, Spanish, Carabi, Chinese (Lafududeeyay), Bengali, iyo Haitian Creole adoo kahelaaya: www.counsel.nysed.gov.

Fadlan ogoow waaxdu waxay utaagantahay ilaalinta sirnimada macluumaadka heerka shaqsi ee ardayga waxay u ilaalisaa macluumaadka noocaan ah sida ay qabaan shuruuqda arimaha shaqsiyaadka ugaarka ah iyo xeerarka, ayna kamid yihiin Sharciga Xuquuqda Waxbarasho Federaliga ah ee Qoyska iyo arimaha qaaska u ah shaqsiyaadka.

Waaxdu waxay soo saaraysaa adeegyo lasiiyo waaliska, dadka masuulka ka ah, iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaaya wixii quseeya DASA oo loo turjumay tobanka luuqadood ee ugu saraysa ee looga hadlo Dhamaan Gobalka New York.

Intaa waxaa siidheer, NYSED waxay aqoonsatay adeegyada soo socda iyo qalabka kuwaasoo gacan siin kara shaqaalaha dugsiga, ardayda, waalidiinta, iyo bulshooyinka. Fadlan isticmaal adeegyadaan meesha kuhaboon, kunosoo biir dadaaladayada si loo xaqiijiyo badqabka iyo caafimaadka dhamaan arday adoo u adeegsanaaya qalabkaan bulshooyinka iskuulkaaga yoolalkiisa iyo baahiyihiisa.

